



LMBR. AMARKA SARE 20-08

**XIRITAANADA DUGSIYADA IYO BIXINTA ADEEGYADA DUGSIGA KU
SALAYSAN IYO DARYEELKA ILMAHA IYADOO LAGA JAWAABAYO
FAAFIDDA CUDURKA CORONAVIRUS (COVID-19)**

Maarso 8, 2020, waxaan soosaaray baaq xaalad degdeg ah anoo cuskanaya ORS 401.165 *et seq.* taasi oo ay ugu wacan tahay halista ku aaddan caafimaadka dadwaynaha ee caabuqa coronavirus (COVID-19).

Maarso 11, 2020, World Health Organization (Ururka Caafimaadka Adduunka) wuxuu ku dhawaaqay in COVID-19 yahay mid adduunka ku faafay.

Maarso 12, 2020, waxaan ku dhawaaqay in dugsiyada dadwaynuhu xirnaadaan gobolka oo dhan, laga bilaabo Maarso 16, 2020, ilaa Maarso 31, 2020, si gacan looga gaysto joojinta faafidda COVID-19 ee bulshooyinka gobolka.

Maarso 13, 2020, Madaxwaynaha Maraykanka ayaa ku dhawaaqay in COVID-19 yahay xaalad degdeg ah oo qaran.

Maarso 16, 2020, Waaxda Adeegyada Aadanaha ayaa soo rogtay tallaabooyinkii ugu dambeeyey ee kahortag si ay u xadiddo booqdayaasha xarumaha daryeelka muddada dheer iyo xurmaha kale ee la deggan yahay. Maamulka Caafimaadka Oregon wuxuu ka qaaday tallaabooyin la mid ah Cusbitaalka Gobolka Oregon iyo xarumaha caafimaadka habdhaqan ee kale, wuxuuna xadiday ciddii la dhigayo Cusbitaalka Gobolka Oregon. Waaxda Oregon ee Xabsiyada way joojisay dhammaan booqashooyinka xabsiyada gobolka.

COVID-19 wuxuu keeni karaa cudur neefmareenka ku dhaca oo horseedaya xanuun halis ah ama dhimasho. World Health Organization (Ururka Caafimaadka Adduunka) wuxuu u tixgaliyey COVID-19 mid adduunka wada gaaray. COVID-19 wuxuu dadka isugu gudbaa qufaca, hindhisada, istaabashada, oo ay kujirto taabashada meel fayraska leh kadibna inaad taabato afka, sanko, ama indhaha.

Saraakiisha caafimaadka gobolka iyo deegaanku waxay sheegeen in fayrasku uu bulshada dhex wareegayo lana filayo in tirada uu haleelay kordhaan. Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurka (CDC) ee Maraykanka waxay sheegeen in COVID-19 uu aad u gudbo marka qofku astaamaha leeyahay, laakiin sidoo kale uu gudbi karo kahor astaamuhu inayna muuqan. CDC waxay ku talisay tallaabooyin si loo xadido faafidda cudurka ee bulshada, oo ay kujirto xadidaad dhacdooyinka iyo kulamada ah.



**LMBR. AMARKA SARE 20-08
BOGFGA LABAAD**

Tirada qiyaasta ah ama la xaqiijiyey ee kiisaska COVID-19 waxay sii waddaa inay korodho Oregon. Maarso 8, 2020, markii aan ku dhawaaqay xaalad degdeg ah, waxa jiray 14 kiis oo qiyaas ahaa ama la xaqiijiyey Oregon. Markii la gaaray Maarso 12, 2020, waxa jiray 21 kiis. Maantadan, waxa jira ugu yaraan 65 kiis iyo hal dhimasho.

Si waafaqsan xeeladaha yaraynta ee ay ku talisay CDC marka la eego COVID-19, si loo yareeyo faafidda cudurka, iyo si looga ilaaliyo dadka reer Oregon ee halista ugu badan ugu jira inay qaadaan cudurka, waxaan u arkay daruuri in dhakhso loo qaado tallaabooyin kale xagga dugsiyada. Waxaan sidoo kale ogaaday in xiritaanada dugsiyadu ay si aan sinnayn u saameeyeen carruurta ugu nugul ee Oregon iyo qoysaskooda. Ficil ayaa daruuri ah si loo yareeyo kala-go'a ay ku keeneen xiritaanada dugsiyadu nidaamka daryeelka caafimaadka Oregon, jawaab-bixiyayaasha kowaad, iyo shaqaalaha xaaladaha degdegga ah.

HADDABA, WAXA AMAR IYO TILMAAN LAGU BIXINAYAA:

1. Marka la eego Amarka Sare, “dugsiyada dadwaynaha” waxa kamid ah dugsiyada gudaha degmo dugsiiyeed, degmada adeegga waxbarasho, ama caqdiga dadwaynaha, sida ku qeexan ORS 330.003(3), ORS 330.005(2), ORS 334.003(2), ama ORS 338.005(2). Dugsiyada qabiilada iyo kuwa gaarka ah Amarkan Sare ma khuseeyo.
2. Amarkan Sare wuxuu xaqiijinayaa oo uu kordhinaya amarkaygii hore ee Maarso 12, 2020, ee la xiriiray xiritaanada dugsiyada dadwaynaha, ee aan ku soosaaray awoodahayga sharci ee Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadwaynaha, iyo awoodahayga xaaladdaha degdegga ah sida ay dhigayaan ORS 433.441(3)(a) iyo (d), ORS 401.175(1), iyo ORS 401.188(2) iyo (3). Dhammaan dugsiyada dadwaynuhu waa inay ka xirnaadaan ardayda laga bilaabo Maarso 16, 2020 ilaa Abriil 28, 2020 (“muddada xirnaanshaha”), ilaa mudadaas uu kordhiyo ama soo afjaro xilli hore Badhasaabku.
3. Sida ay dhigayaan awoodahayga xaaladaha degdegga ah sida ay dhigayaan ORS 401.168(1), ORS 401.175(1), ORS 401.188(2) iyo (3), iyo ORS 401.192(1), waxa la farayaa in dugsiyada dadwaynaha ee ku xiran baaragaraafka 2 ee Amarkan Sare muddada xirnaanshaha waa inay sii wadaan helitaanka qoondooyinka uga imanaya Sanduuqa Dugsiyada Gobolka, haddii ay dhab ahaan kujireen kalfadhi muddada xirnaanshaha.



4. Si ay uga helaan qoondooyin Sanduuqa Dugsiyada Gobolka muddada xirnaanshaha ee uu sheegayo baaragaraaf 2 ee Amarkan Sare, dugsiyada dadwaynuhu waa inay:

**LMBR. AMARKA SARE 20-08
BOGGA SADDEX**

- (a) Sii wadaan gaarsiinta taageerada waxbarashada dheeraadka ah ardayda ilaa intii suurtoagal ah iyadoo loo marayo waxbarasho madaxbannaan iyo siyaabo kale oo habboon.
- (b) Ku bixiyaan cuntada dugsiya meelo aan la iskugu imanayn iyadoo loo marayo Barnaamijka Adeegga Cuntada Xagaaga iyo Ikhtiyaarka Xagaaga Joogtada ah, si waafaqsan shuruudaha ay bixisay Waaxda Waxbarashada Oregon iyo Waaxda Beeraha Maraykanka. Lacagaha deeqda gaadiidka ee ka imanaya Sanduuqa Dugsiyada Gobolka waxa u isticmaali kara dugsiyada dadwaynaha u gaarsiinta cuntada qaab aan la isku imanayn goobaha dugsiyada ee mutaystay iyadoo la isticmaalayo adeegyada gaadiidka degmo dugsiyeedka.
- (c) Siiyaan adeegyada kabka iyo adeegyada maaraynta xaaladda degdegga ah, oo ay kujiraan laakiin aan ku koobnayn, bixinta daryeelka ilmaha ee jawaab-bixiyayaasha kowaad, shaqaalaha xaaladda degdegga ah, xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka, iyo shakhsiyaadka kale, si waafaqsan wixii tilmaamo iyo shuruudo ah ee ay bixisay Waaxda Waxbarashada ee Oregon. Dugsiyada dadwaynuhu waxay adeegsan karaan lacagaha deeqda gaadiidka oo ka imanaya Sanduuqa Dugsiyada Gobolka ee adeegyada gaadiidka degmo dugsiyeedka si loo taageero gaynta iyo ka soo qaadista carruurta daryeelka ilmaha ee dugsiya.
- (d) Soosaaraan qorshayaal loogu talagalay hawlgalka adeegyada aan ahayn waxbarasho ee daruuriga ah, oo ay kujiraan adeegyada cuntada, ee ardayda iyo qoysaska.
- (e) Sii wadaan inay si joogto ah mushaharka u siiyaan dhammaan shaqaalaha dugsiyada dadwaynaha. Dugsiyada dadwaynaha ee uu khuseeyo Amarkan Sare waxay ka rabi karaan shaqaalaha dugsiya inay yimaadaan shaqada si ay u caawiyaan bixinta adeegyada kabka iyo hawlaha maaraynta xaaladda degdegga ah.
5. Waaxda Waxbarashada Oregon waa inay siiso tilmaamo dheeraad ah dugsiyada dadwaynaha oo la xiriira amarrada ku xusan baaragaraafka 4 ee Amarkan Sare, markii loo baahdo.



6. Guddida Waxbarashada Gobolka Oregon, iyadoo kaashanaya Waaxda Waxbarashada Oregon, waa inay ku dhaqaaqdo wixii xeer-samayn ah ee kumeel gaar ah ee daruuri ah si ay u sahlaan amarrada Amarkan Sare, iyo awoodda dugsiyada dadwaynaha ee ka jawaabidda xaaladda degdegga ah ee jira. Xeer-samaynta waa inay kujiraan, laakiin ayna ku koobnaan, wax ka baddalka shuruudaha wakhtiga waxbarasho ee OAR 581-022-1620.

**LMBR. AMARKA SARE 20-08
BOGGA AFAR**

7. Waaxda Waxbarashada Oregon, Maamulka Caafimaadka Oregon, iyo Waaxda Adeegyada Aadanaha waxa la faray inay siiyaan tilmaamo degmo dugsiyeedyada iyo bulshooyinka si loo hubiyo joogtaynta adeegyada caafimaadka maskaxda ee carruurta iyo qoysaskooda.
8. Waaxd Waxbarashada ee Oregon, Qaybta Barashada Hore, iyo Waaxda Adeegyada Aadanaha waxa la faray inay iska iskaashadaan oo ay bixiyaan khayraadka si loo taageero loona hubiyo magdhawga, joogtaynta, iyo helitaanka daryeelka ay bixiyaan bixiyayaasha daryeelka ilmaha ee qoyska kusalaysan, xarunta kusalaysan, iyo liisanka laga dhaafay.
9. Iyadoo lala tashanayo Golaha Barashada Hore, Agaasimaha Nidaamka Barashada Hore wuxuu halkan ka jeedinaya kuna oggolaanayaa dhaafidda, hakinta, ama wax ka baddalka xeerarka maamul ee jira ee la xiriira daryeelka ilmaha, iyo aasaasidda shuruudaha daryeelka ilmaha ee xaaladda degdegga ah, sida uu sheegayo baaragaraaf 4(c) ee Amarkan Sare.
10. Wax kamid ah Amarkan Sare waa inaan loo fasiran inuu ka rabo shaqaalaha dugsiyada dadwaynaha ee ka mid ah kooxaha halista ugu jira, ama shaqaalaha dugsiyada dadwaynaha ee haya xubin kuwa halista ugu jira ah ee qoyskooda, inuu qaado tallaabo ku liddi ah talooyinka caafimaadka dadwaynaha ama talada dhakhtarka qofka shaqaalaha ah.

Amarkan Sare waxa la soosaaray iyadoo la eegayo awoodda ay Badhasaabka siiyeen ORS 401.165 to 401.236. Sida ay sheegayso ORS 401.192(1), amarada ku qoran Amarkan Sare waa inay noqdaan qaar si buuxda u dhaqangala, waana in wixii shuruuc, xeerar iyo amaro jira la hakiyo ilaa iyo xadka ay ka hor imanayaan shaqada awoodaha xaaladaha degdegga ah ee Badhasaabka.

Xafiiska Badhasaabka Gobolka Oregon



Laga qabtay Portland Oregon maalintan 17^{ka} Maarso, 2020.

Kate Brown
BADHASAAB

CADDAYN:

Bev Clarno
XOGHAYAHA ARRIMAHA DIBADDA